JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |



# XEERKA URURADDA SAMAFALKA AAN DAWLIGA AHAYN (USDA)
# XEER LR.43/2010


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2022*

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/DM/249-300/112010

DATE 10/11/10

# Degreeto Madaxweyne No: 0082/112010

**Dhaqangalka Xeer Lr. 43/2010 ee Ururada Samafalka aan Dawliga ahayn**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: | Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhurriyadda Somaliland, |
| Markuu arkay: | Go'aanka Golaha Wakiiladda JSL ee summaddiisu tahay GW/KF-13/502/2010 ee 02/10/2010, |
| Markuu arkay: | Qodobka 75aad ee Dastuurka Jahmhuuriyadda Somaliland. |

Wuxuu soo saaray,

Dhaqan-galka Xeer No: 43/2010 ee Ururadda Samafalka aan Dawliga ahayn oo lagu baahin doono faafinta rasmiga ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND President

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.

Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha Wakiilada
Xarunta Hargeysa.

Ref: GW/KF-13/502/2010

Date : 02/10/2010

## Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Ururadda Samafalka ee Aan Dawliga ahayn ( No: 43/2010)

### GOLAHA WAKIILADA JSL

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Qodobka **10**[aad], **23**[aad], 39 [aad], iyo **78** [aad] ee Dastuurka JSL. |
| MARKUU TIXGELIYEY: | Baahida loo qabo in la helo xeer si hufan loogu maamulo Ururada Samafalka ee Aan Dawliga Ahayn. |
| MARKUU AQOONSADAY: | kaalinta ay Ururada Samafalku kaga jiraan bulshada |
| MARKUU GARAWSADAY: | In la helo ururo bulsho oo xoog leh oo madax banaan |
| MARKUU U CODEEYEY: | Xeerka Ururada Samafalka ee Aan Dawliga Ahayn, **Kal-fadhigii 13**[aad] **fadhigiisii 10** [aad] **ee 02/10/2010** oo ay goob joog ahaayeen **(48)** Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha **Golaha Wakiilada.** |

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah oo dhan **Soddon iyo Laba (32 cod)** oo gacan taag ah ku Ansixiyay Xeerka Ururada Samafalka ee Aan Dawliga Ahayn ee (Xeer **No. 43/2010)**, halka **shan (5) mudane** ka diideen, **Toban (10)** mudanane ka aamuseen,**Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

**C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**

## GOLAHA WAKIILADDA J.S.L.

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobada 10aad, 23aad, iyo 39aad iyo 78aad Dastuurka Qaranka JSL. |
| Markuu Tixgeliyey: | Baahida loo qabo in la helo Xeer si hufan loogu maamulo ururadda Samafalka ee aan Dawliga ahayn |
| Markuu Tixgeliyay: | Dooddii Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL |
| Markuu u codeeyey: | wax-ka bedelkii Golaha Guurtida ay ku soo sameeyeen Qodobo ka mid ah Xeerkan |

## WUXUU ANSIXIYAY XEERKAN:



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 1aad

## Qeexidda erayada

Hadii aan si kale loogu sheegin nuxurka xeerkan, erayadan waxa loola jeedaa sidan hoos ku qoran:

**''Urur Samafalka aan Dawli Aahayn''** (USDA) waxa loola jeedaa shakhsiyaad iskood isku diray ama isu abaabulay ama isu- bahaystay, kana madax- bannaan dhaqdhaqaaq siyaasadeed, dhex-dhexaad ah, oo aan macaash doon ahayn.

Kuwaas oo noqon Kara heer Caalami, Qaran, Gobol, Degmo iyo tuulo Community-based organization). Ururaddaas oo uu dhisan inay u adeegaan

Xubnahooda iyo bulshadaba kana shaqeeya hagaajinta adeegyada bulshada (social services), xaaladaha bani'adamnimo ee deg-degga ah (humanitarian issues), horumarinta, ilaalinta deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah, maamul-wanaagga ilaalinta xuquuqda, daryeelka iyo kor-u-qaaddida nolosha bulshada (livelihoods), tababarrada aqooneed iyo kobcinta tayada iyo hourmarinta.

**"Aan macaash-doon ahayn"** waxa loola jeedaa ka durugsan dheefsasho ama faa'iido shakhsi-ahaaneed, waxa se jiri kara shaqaale qaata mushahar ama dhaqdhaqaaq dakhli-abuurineed oo faa'iidadeeda lagu celin doono horumarinta bulshada iyadoo loo maraayo wax-qabadka ururadda aan Dawliga ahayn (USDA).

**"Ka madax-bannaan dhaqdhaqaaqa siyaasadeed"** waxa loola jeedaa ururadda inaanay raadsan awood siyaasadeed (political power) isla markaana aanay u ololeyn xisbiyo siyaasadeed.

**"Ururrada aan Dawli ahayn ee Caalamiga ah (USDAC)"** waxa loola jeedaa ururrada aan Dawliga ahayn shisheeye ee ka sharciyeysan wax kabadan hal dal oo shisheeye.

**"Ururadda aan Dawliga ahayn ee shisheeye (USDASH)"** waxaa loola jeedaa ururadda aan Dawliga ahayn ee ka sharciyaysan hal dal oo shisheeye.

**"Ururadda aan Dawliga ahayn ee Waddaniga ah (USDAW)"** waxa loola jeedaa ururadda waddaniga/sokeeye ee ka diiwaan gashan dalka kana hawl gala dalka.

**"Guddi"** waxaa loola jeedaa Guddiga la-tashiga arrimaha Ururada Samafalka aan Dawliga Ahayn (USDA) ee lagu sharciyeeyay xeerkan oo hoos imanaya Qodobka 6aad.

**"Dan-Wadaag"** waxa loola jeedaa ardaa kulmiya Ururada aan Dawliga Ahayn ee wadaniga (USDAW) ah oo lagu sharciyeeyay si waafaqsan Qodobka 22aad.

**"diiwaan-geliye Guud"** waxa loola jeedaa Agaasimaha isu-duwidda Ururrada aan Dawliga Ahayn (USDA) oo lagu magacaabay si waafaqsan Qodobka 4aad ee xeerkan.

**"diiwaan-geliye"** Waxaa loola jeedaa diiwaan-geliye Qaran, Gobol ama Degmo.

**"Wasiir"** Waxaa loola jeeda Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta iyo horumarinta Qaranka JSL.

**''Wasaarad''** Waxa loola jeedaa Wasaaradda Qorsheynta iyo Hurumarinta Qaranka JSL.

**"diiwaan"** waxa loola jeedaa diiwaanka lagu keydinayo xogaha ururadda aan Dawliga Ahayn.



FAAFINTA RASMIGA AH

**"Sarkaal Xukuumadeed"** waxaa loola jeedaa mas'uul Xukuumadeed oo lagu magacaabay Qodobka 4aad, xubintiisa 1aad iyo Qodobka 19aad ee xeerkan.

## Qodobka 2aad

## Magaca xeerka

1. Xeerka waxaa loogu yeedhayaa hadda ka dib xeerka ururadda Samafalka aan dawliga ahayn (USDA)
2. Xeerkan waxaa lagu maamulayaa urur kasta oo aan dawli ahayn, madaxabanaan, macaash doon ahayn, oo ka kooban ururadda aan dawliga ahayn ee wadaniga ah (USDAW), ururadda aan dawliga ahayn ee dalalka shisheeye (USDASH) iyo ururadda aan dawliga ahayn ee Caalimiga ah (USDAC).
3. Waxaa kaloo xeerkan hoos imanaya dalladaha (Umbrellas), midawga iyo bah-wadaagaha ururaddaas aan dawliga ahayn.
4. Xeerkan ma hoos imanayaan hay'adaha Qaramada Midoobay; Ururada xirfadeed ama mihnadeed, ururadda bulsho ee aan samafalka hawshoodu la xidhiidhin, Ururadda ganacsi, wershadeed ama shaqaale.

## Qodobka 3aad

## Ulajeedooyinka Xeerkan:

1. Inu u dhiiri-geliyo sidii ururadda samafalka ee aan dawliga aheyni, si hufan oo mug-leh uga qayb-qaadan lahayeen, horumarka dalka.
2. In laga dhigo ururadda ha'yado sharci ah (legal personality)
3. In la iskuduwo hawlaha horumarka ee ay uruada bulshada ee aan dawliga aheyni qabtaan si loo waafajiyo qorsha qaranka iyo siyaasada dalka ee ku wajahan horummarka dalka.
4. In la dhiirigeliyo ururaro bulsho oo xoog ah oo madaxbanaan.
5. In loo hagaajiyo si daacad ah iyo la xisaabtankooda (Transparency & Accountablity) –ga USDA.

# QEYBTA 2aad

# MAAMULKA IYO ISU-DUWIDDA URURADDA AAN DAWLIGA AHAYN

## Qodobka 4aad

## Magacaabista diiwaan-gelyaha Guud

1. Wasiirku waxa uu magacaabi doonaa sarkaal Xukuumadeed oo noqon doona diiwaan-geliyaha Guud ee ururadda aan dawliga ahayn
2. Diiwaan-geliyaha Guud ee ururadda aan dawliga ahayni waxa uu derejo ahaan noqon doonaa Agaasime qaabilsan ururadda aan dawliga ahayn iyo xidhiidhka u dhexeeya xukuumadda iyo ururaddaa.

## Qodobka 5aad

## Xilalka iyo waajibaadka diiwaan-geliyaha Guud

1. Diiwaan-geliyaha Guud waxa uu noqon doonaa Xoghayaha Guddiga latashiga;
2. Xilka iyo waajibaadka diiwaan-geliyaha Guud waxa ay noqon doonaan:
   a. In uu talo ka bixiyo dhinacyada hab-dhaqanka, siyaasadda (policy) iyo arrimaha kale ee la xidhiidha ururadda an dawliga ahyn.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

b. In uu xaqiijiyo dhaqan-gelinta xeerkan.
c. In uu xaqiijiyo sharcinimada ururadda aan dawlig ahayn.
d. In uu dhiirigeliyo is-kaashiga uu la leeyahay qaybaha wasaaradaha iyo xafiisyada ee la xidhiidha arrimaha ururadda aan dawliga ahayn
e. In uu diiwaan-geliyo ururadda aan dawliga ahayn.
f. In uu hayo, isla markaana xafido diiwaanka ururadda aan dawliga ahayn
g. In uu keydiyo war-bixinaha iyo dhukumentiyadda la xidhiidha ururadda aan dawliga ahayn;
h. In uu si habsami ah u maamulo shaqaalaha waaxdiisa hoos yimaada
i. In uu galo waajibaadka xoghaynimo ee Guddiga.

## Qodobka 6aad

## Magacaabista Guddi la-tashi

1. Waxaa la magacaabi doonaa Guddigga wada- tashiga ee ururadda aan dawliga ahayn (Consultative Committee of non-governmental organizations) oo halkan loogu yeedhi doono "Guddiga wada-tashiga"
2. Habka magacaabista Guddigaa, meelaha ay ka kala imanayaan, qaab-dhismeedkooda, muddada xilkooda iyo xeer-hoosaadkooda, waxaa xeer-nidaamiye faah faahfaahinaya arrimahaa ka soo saari doona Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo horumarinta Qaranka, kaas oo aan ka hor imayan xeerkan.

## Qodobka 7aad

## Waajibaadka Guddiga la-tashiga

1. Xilalka Guddiga wada-tashiga waxa ka mid noqon doona: -
   a. In uu fududeeyo horumarka iyo hirgelinta hab-dhaqanka iyo siyaasadda (policy) ururadda aan dawliga ahayn
   b. In uu fududeeyo wax-qabashooyinka ururadda aan dawliga ahayn
   c. In uu darso war-bixin sanadeedka ururadda aan dawliga ahayn, talooyina ka soo jeediyo;
   d. In uu Xukuumadda kala taliyo hawl-gallada ururadda aan dawliga ahayn iyo doorkooda ka qayb-qaadashada horoumarineed
   e. In uu u tilmaamo ururadda aan dawliga ahayn siyaasadda hagaysa (policy guidelines) isna waafajiyaan wax qabadkooda horumarineed ee waafaqsan qorshaha Qaranka;
   f. In uu fududeeyo is-waraysiga iyo wada-tashiga isa markaana ku wacyi-geliyo wada shaqaynta u dhexaysa ururadda samafalka aan dawliga aheyn (USDA) iyo xukuumadda
   g. In uu baadhitaan iyo waraysi ku sameeyo ku dhaqanka dastuurka uu leeyahay urur kasta oo ka mid ah ururaddaas aan dawliga ahayn
   h. Inuu maareeyo (xaliyo) khilaafka ka dhex abuurma urur gudihiisa ama laba urur dhexdood ama in ka badan;

   In uu gacan ka gaysto, isagoo la kaashanaya diiwaan-geliyaha Guud, sida ay noqonayso derajooyinka ururadda waddaniga ah ee aan dawliga ahayn, kuwaas oo u kala bixi doona derejooyinka (a, b, c, & d) iyadoo la waafajinaayo sharciyadda, raad-raaca taariikheed, waxqabadkooda, iyo tirada gobolada iyo degmooyinka ay ka hawl galaan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

i. In uu soo jeediyo in tallaabooyinka ku haboon laga qaado ururadda aan dawliga ahayn, marka ay dhamaato kala derejayntoodu;
j. In uu guto xilka kale ee uu u igmado wasiirku

2. Isagoo gudanaya waajibaadka lagu qeexay xeerkan, waxay ku dhaqmi doonaan nidaam wada-tashi, isu-duwid iyo iskaashi uu la yeesho wasaaradaha iyo hay'adaha kale

## Qodobka 8aad

## Waajibaadka Wasaarada Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka

1. Wasaaradda Qorsheynta iyo Horumarinta Qaranka ayaa uga wakiil ah dawladda JSL diiwaan-gelinta, maamulka iyo isku-dubaridka ururadda aan dawliga ahayn ee wadaniga, shisheeye ama caalamiga ah.
2. Wasaaraddu waxay u xilsaaran tahay:
   a. Waa tan keliya ee metalyasa xukuumadda ee u xil-saaran diiwaan-gelinta ururadda aan dawliga ahayn ee caalamiga/waddaniga ah ama shisheeye ee ka hawl gala Somaliland gudaheeda
   b. Masuul ka tahay kala doorashada goobta ama goobaha hawlgalka ee ururadu ka hawl geli karaan waxaanayna ku salaynaysaa baahiyaha gobollada iyo degmooyinka dalka oo dhan iyadoo la raacayo qorshaha guud ee horumarineed, si la isugu dheelli-tiro horumarinta bulshada-taas oo lagala tashan doono ururka hawl gelaya.
   c. U taagan tahay bar- kulan isgaadhsiineed oo u dhexeeya xukuumadda Somaliland iyo ururaddaas. Dhammaan xidhiidhka qoraallada ah ee dhex mara wasaaradaha iyo ururaddaas, waxa nuqul la siinayaa Wasaaradda.
   d. Isku-xidhida ururadda, maamullada gobollada, degmooyinka, wasaaradaha wada-shaqayntu ka dhexayso iyo hay'adaha kale ee Xukuumadda si wada shaqayn wanaagsan loo helo.
   e. Taageerida wax-qabadka ururaddaas, ilaalinta hantidooda si loo xaqiijiyo ujeedooyinkii mashaariicda ururaddaasi maal–geliyeen, si waafaqsan heshiis-wadareedkii la wada galay.
   f. U soo ban-dhigaysaa war-bixinnada qiimeynta ee ay Wasaaraddu ku samaysay hawlahooda, si ay dib-u-eegid iyo faallo ugu sameeyaan ka hor intaan la gebo-gebayn qiimeyntaas.
   g. U fududeynta sameynta cashuur-dhaaf soo dejinta agabka xafiisyada iyo qalabka mashaariicda laga fulinayo dalka gudihiisa. haddii Ururku hanti gaar ahaaneed uu la soo wareego ama dalka la yimaaddo qalab culus (heavy machinery) sida cagafyo iyo qalabka macdanta iyo batroolka lagu baadho iwm oo uu u baahan doono inuu dib ula noqdo, waa inuu caddeyn keenaa inta aanu hawl-galkiisa bilaabin, si loogu fududeeyo sharciyadda dib-ula-noqoshada.
   h. U fududeynta alaabta kale ee u baahan cashuur-dhaaf looguna talo-galay inay ka gudbaan soohdimaha Somaliland, si waafaqsan shuruucda dalka.

      Xaqiijinta dokumantiyada la xidhiidha codsigooda waxa u xil saran wasaaradda iyadoo la tashanaysa wasaaradda Maaliyadda.

   i. Ka caawinaysaa shaqaalaha shisheeye ee u shaqeeya ururaddaas cashuur dhaafka agabka shakhsi ama qoys ee ay dalka la yimaaddaan iyo dib-ula noqoshadooda, si waafaqsan sharciga.
   j. U fududeynaysaa soo-gelidda Somaliland iyo degannaansho qaanuuni ah (legal residence) khuburada shisheeye ee ururadaas aan dawliga ahayni uga baahan doonaan fulinta mashaaricdooda, iyadoo la waafajinayo xeerka shaqaalaha rayidka.
   k. Waxay masuul ka tahay xog-siinta, tilmaamidda iyo hawlaha isu-duwineed ee ururadda caalamiga/shisheeye/waddaniga ah ee dalka ka hawl gala.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

l. Taageerida, gacansiinta, tayaynta iyo horumarinta USDAW.
m. Dejinta iyo soo saarista xeer-nidaamiyada, wareegtooyinka, hagayaasha iyo amaradda lagu maamulayo USDA.
n. diiwaan-gelinta, ruqsad-siinta, ruqsad ka laalista, ruqsad ka hakinta iyo anshax-marinta ururadda samafalka aan dawliga ahayn
o. Hawlaha kale ee sharcigu u xilsaaro

## Qodobka 9aad

## Diiwaanka ururadda aan Dawliga ahayn

1. Waxaa la abuurayaa diiwaan guud oo lagu qoro dhammaan ururadda aan dawliga ahayn ee xeerkani nidaamiyo.
2. Diiwaanka guud waxaa qayb-qayb loogu diiwaangelinayaa ururadda aan dawliga ahayn ee wadaniga ah (USDAW), ururadda aan dawliga ahayn ee shisheeye (USDASH), ururadda aan dawliga ahayn ee Caalamiga ah (USDAC) iyo dalladaha ururaddaa.
3. diiwaanka waxaa lagu qorayaa ururka marka shahaadada la siinayo
4. Diiwaanka guud waxaa loo xidhayaa sanad sanad, iyadoo lagu xusayo diiwaanka taariikhda la diiwaangeliyay ururka.
5. Ururka aan dawliga ahayn ee sanadka dhexdiisa laga laalo shahaadada ama lagala noqdo shahaadada, waxaa laga saarayaa diiwaanka magaciisa, iyadoo la xusayo sababta laalista ama kala noqoshada, marka ay dhamaato muddada cabashu ama la diido cabashadiisa haddii shahaadadiisa lagaga laalay si xeerkan wafaqsan.
6. Ururka laga hakiyo shahaadada sanadka dhexdiisa ama laga qaado talaabo kale oo anshaxmarin waxaa lagu xusanayaa diiwaanka hakintaa ama talaabada kale ee anshax-marin ee laga qaatay.
7. Ururka aan dawliga ahayn ee loo diiwaangeliyo si xeerkan waafaqsan, waxaa lagu qorayaa diiwaanka waxyaabahan:
    a. Magaca ururka aan dawliga ahayn
    b. Xaruntiisa, xafiisyada laamihiisa, ciwaankiisa, Guddiga Hogaamiya iyo Agaasimaha Fulinta ama cida u dhiganta qaab-dhismeedkiisa iyo ciwaanadooda.
    c. Wadaaga (sectors) uu ka shaqeeyo iyo degaanka uu ka hawlgalo
    d. Hay'adaha, wasaaradaha ama ururadda uu la shaqeeyo
    e. Dalka ama dalalka kale ee uu ka diiwaangashan yahay
    f. Lambarka shahaadada iyo taariikhda diiwaangelinta
    g. Muddada shahaadada diiwaangelinta
    h. Iyo macluumaad kasta oo kale oo lama huraan ah.
8. Urur walba oo aan dawli ahayn oo loo diiwaangeliyo si xeerkan waafaqsan wuxuu yeelanayaa fayl lagu kaydiyo macluumaadkiisa.

## Qodobka 10aad

## Waajibaadka ururadda aan dawliga ahayn

Urur kasta oo aan dawli ahayn oo si xeerkan waafaqsan lagu diiwaangeliyo waxaa waajib ku ah:

1. In ixtiraamo, aqoonsado madaxbanaanida, aayo-katashiga qaranimada JSL, dhaqanka iyo caqiidada ummadda JSL



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR ... OFFICE

2. In uu ixtiraamo, kuna dhaqmo dastuurka, xeerarka kale jamhuuriyada Somaliland, una hogaansamo siyaasadaha xukuumadeed iyo talooyinka xukuumada ee ku wajahan wax-qabadkooda
3. Barnaamijyada ururadda samafalka aan dawliga aheyn (USDA) ee caalamiga ahi waa inay la jaan-qaadaan qorshaha guud ee horumarineed ee dalka (national development plan).
4. In hantidiisa, kharashkiisa, dakhligiisa uu u adeegsadaa oo keliya ujeedadiisa macaash raadis la'aanta oo shuruucda dalka waafaqsan.
5. In dhammaan hawlihiisu noqdaan kuwo lawada-arki karo (transparent) oo dabagal (accountable) leh, waana in uu si caqligal ah u bixiyaa mushaharada/gunnooyinka shaqaalaah, kirooyinka guryaha/gaadiidka iyo kharashaadka maamul iyo wax soo iibsi, si uu u kasbado kalsoonida dadwaynaha.

## Qodobka 11aad

### Arrimaha ka reeban ururadda aan dawliga ahayn

Ururadda aan dawliga ahayn, waxaa ka reeban:

1. Ka qaybgalka hawaha siyaasadeed iyo ololayaasha doorashooyinka siyaasadeed ee si gaar ah loo gacansiinayo urur ahaan, urur/ xisbi siyaasadeed ama musharax/musharaxiin doorasho siyaasadeed
2. Kicin, abaabul, gacansiin qalalaase, iska hor imaad gacan ka hadal leh ama dagaalo iyo ka qaybqaadasho hawlo ciidan ama tababaro ciidan
3. Keenid, soo dejin, samayn, ka ganacsi hub iyo waxyaabaha qarxa.
4. Ka qaybqaadasho, caawin ama gacansiin iyo dhiirigelin argagixiso iyo falal argagixiso
5. Ku hawlanaan ama caawin soo saaris, beerasho, safayn, dhoofin, soo dejin, kaydin, ka ganacsi, haysasho, isticmaal ama qaybin maandooriye.
6. In loo isticmaalo dhaqaalaha iyo hantida ururka, wax kasta oo lid ku ah danaha qaranka, ciqiidada diimeed, anshaxa bulshada, caafimaadka, xasiloonida qaranka ama wax kasta oo ku wajahan qabyaalada iyo takoor.
7. In dhaqaalaha iyo hantida ururka loo adeegsado hawlo ganacsi.
8. Fal kasta oo kale oo ay reebeen shuruucda JSL.

## QAYBTA 3AAD
## ASAASKA, DIIWAAN-GELINTA URURADDA AAN DAWLIGA AHAYN EE WADDANIGA AH (USDAW)

## Qodobka 12aad

### Asaaska urur aan dawli ahayn oo wadani ah

1. Haddii aan xeerku si kale u tilmaamin urur aan dawli ahayn oo wadani ah waxaa aasaasi kara ugu yaraan shan (5) qof oo muwaadiniin ah ama ajinebi dalka rasmi u degan ah ama muwaadiniin iyo ajinebi intooda badan dalka degan yihiin oo wada jira.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 13aad

## Shuruudaha diiwaan-gelinta

1. Urur kasta oo aan dawli ahayn oo waddani ah waa inuu is-diiwaan geliyaa iyadoo la raacayo shuruudaha xeerkan.
2. Waa in uu leeyahay xafiis shaqeeya iyo ciwaan sugan, magac u gaar ah iyo astaan u gaar ah
3. Waa in uu leeyahay xeer hoosaad uu garyaqaan soo ansixiyay, dhamaan xubnaha aasaasayashu ku saxeexan yihiin
4. Waa in uu leeyahay qaab-dhismeed awoodahiisu kala qeexan yihiin
5. Waa in xubnihiisu aqoon iyo waaya'aragnimo u leeyihiin wadaagaha/wadaagyada uun ka shaqaynayo
6. Waa in hadafkiisa, ujeedadiisa iyo hawlaha uu rabo in uu ka shaqeeyo ay waafaqsan yihiin xeerarka dalka,
7. Waa in uu diiwaangeliyaha u soo qortaa codsi ay ku qeexan tahay:
   a) Magaca ururka, xarfaha loo soo gaabiyo (markay jiraan), xarunta iyo laamaha ururka (markay laamo jiraan), ciwaanka ururka oo ku jiraan telefano iyo sanduuqa internetka
   b) Magacyada xubnaha aasaasayaasha ururka.
   c) Ujeedada ururka iyo wadaaga/wadaagyada uu ka shaqaynayo
   d) Degaanada uu ka hawlgelayo
   e) Xubnaha guddiga hogaaminta iyo xubnaha maamulka
8. Codsiga diiwaan-gelinta waa in ay ku saxeexan yihiin xubnaha asaasayaasha ama cid ay awood u siiyeen
9. Codsiga diiwaan-gelinta lagu dalbanayo waa in ay weheliyaan:
   a) Nuqul kamid ah dastuurka ururka.
   b) Faahfaahin kooban oo khuseysa magacyada iyo saxeexyada xubnaha asaasayaasha;
   c) Taariikh- nololeedka aasaaseyaasha (CV) iyo sawiradooda iyo caddayn dembi-la'aneed;
   d) Rashiidka bixinta cashuurta diiwaan-gelinta

## Qodobka 14aad

## Dastuurka Ururka

Xeerka ururka aan dawliga ahyn waa in ay ku qeexan yihiin:

a. Magaca rasmiga ah ee ururka oo aan hore loogu diiwaangelin urur hore oo aan dawli ahayn, shirkad ama cid kale.
b. Hadafka, ujeedada iyo hawlaha ururka
c. Tirada xubnaha aasaasayaasha, hadii lagu biiri karo hab-raaca loogu biiri karo iyo habka la isga saari karo.
d. Hab-raaca doorashada golaha/guddiga hogaaminta iyo luminta xubinimada golaha/Guddiga hogaaminta.
e. Sida shirarka loo qabanayo
f. Awoodaha iyo masuuliyadaha shirwaynaha (marka uu jiro) iyo golaha/guddiga hogaaminta.
g. Habka Doorashada, xulashada ama magacaabista maamulka ururka iyo awoodaha maamulka

## Qodobka15aad

## Ogolaanshaha & diidmada diiwaangelinta USDAW

1. Diiwaan-geliyuhu markuu helo codsiga diiwaangelinta ee USDAW, wuxuu hubinayaa in dhammaan shuruudaha ku sheegan qodobka 13aad ee xeerkan uu buuxiyay, isgoo marka uu u arko lama huraan qaadaya talaabooyinkan:
   a) In uu dalbado soo dhamaystir macluumaad ama dhukumanti ka dhiman
   b) In uu dalbado ama raadiyo cadaymo dheeraada ah
2. diiwaan-gelihu markuu hubiyo in shuruudaha xeerkan dhamaystiran yihiin, macluumaadka loo soo gudbiyayna xaqiiq yihiin, wuxuu u gudbinayaa Wasiirka Qorshaynta iyo horumarintu codsiga oo ay ku lifaaqan yihiin, dhammaan macluumaadka uu ka helay codsadaha, warbixin koobaysa wixii uu talaabooyin qaaday ama xog dheeraada ku helay baadhistiisii oo ay weheliyaan talooyinkiisa.
3. Wasiirku, markuu helo macluumaadka faqrada 2aad:
   a) Wuxuu amrayaa in la diiwaangeliyo, haddii uu ku qanco in USDAW ee diiwaangelinta soo dalbaday uu u qalmo in la diiwaangeliyo:
      I. In uu buuxiyay shuruudaha xeerka ku qeexan
      II. Dhamaan macluumaadkiisu dhab yihiin

   b) Wuxuu diidayaa codsiga diiwaangelinta, marka ay u cadaato:

      I. in aanu buuxin shuruudihii xeerku u dhigay

      II. in aanay dhab ay ahayn macluumaadka uu soo gudbiyay

   c) wuxuu dalbanayaa baadhsi ama xaqiijin dheeraad ah, marka uu u arko in loo baahan yahay
4. Diiwaan-geliyuhu marka uu helo amarka wasiirka ee ogolaanshaha diiwaangelinta, wuxuu soo saarayaa shahaadada ruqsada diwaangelinta USADW, wuxuuna ku qorayaa diiwaanka guud.
5. Codsadaha si xeerkan waafaqsan loo diido codsigiisa diiwaangelinta, isla ururkii la diiday dib umasoo codsan karo diiwaangelintiisa muddo sanad gudihiisa ah.

## Qodobka 16aad

## Aasaaska Dalladaha iyo Bah-wadaagta

1. Dalad ama bah-wadaag ururo aan dawli ahayn oo wadani ah waxaa aasaasi kara ugu yaraan 15 urur oo wadani ah oo diiwaangashan oo shaqeeya, kuwaas oo kawada shaqeeya hal wadaage (sector) ama u adeega koox bulsho oo gaar ah, sida haweenka, Naafada, dhalinyarada, dadka laga tirada badan yahay iwm. ama uu jiro hadaf guud oo mideeya ama aag juquraafiyadeed oo ay kawa hawlgalaan
2. Dalad ama dan-wadaag waxaa loo abuuri karaa ujeedo ah:
   a) Kobcinta iyo dhismaha kartiyeed ee ururadda ku bahoobay
   b) Isu-duwida, qiimaynta, kormeerka iyo tayaynta hawlaha iyo barnaamijyada ay ururaddaasi fuliyaan
   c) Difaacida iyo u ololaynta ururaddaa ku bahoobay dallada ama bah- wadaagta
   d) Xalinta khilaafyada bahoobayaasha dhexdooda iyo khilaafka xubnaha dallada ama bah-wadaagta iyo hay'adaha la shaqeeya
   e) Fududaynta wada shaqaynta, iskaashiga iyo xidhiidhka xubnaha dallada ama bah-wadaagta



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR ... OFFICE

3. Waa in xubnaha ku bahoobaya dallada ama dan-wadaagta ay qabsadaan shirwayne dhamaan ururadda ku bahoobay ergo u soo dirtaan oo ka qayb galaan
4. Shirwaynaha aasaaska dallad ama bah-wadaag waa:
   a) In ergooyinka ka soo qabgelayaa ay sitaan kalsooni qoraal ah oo ururadda ay metelayaan ah
   b) In ay goob-joog yihiin Wasaarada Qorshaynta ergo ka tirsan oo goob-joogenimo kaga qaybgelaysa iyo guddiga USD.
   c) In ay leedahay ujeedo cad oo xeer-hoosaadka ku qeexan oo loo midoobayo, taas oo waafaqsan tilmaamaha faqrada 2aad ee qodobkan
   d) In la isgu doortaa jagooyinkiisa iyo xilkiisa si dimoquraadi ah oo muuqata (transparent)
   e) In jagooyinka iyo xilalaka la isugu doortaa urur ahaan ee aanay is dooran shakhsiyaad.

Qodobka 17aad

diiwaangelinta dalladaha USDAW

Hab-raaca diiwaangelinta ee dalladaha iyo bah-wadaagta ururadda aan dawliga ahyn ee wadaniga ah waxaa loo raacayaa tilmaamaha qodobada 16aad ee xeerkan.

Qodobka 18aad

Isku biirid ama midow laba ama ka badan oo USDAW

1. Laba urur samafal aan dawli ahayn oo wadani ah ama ka badan oo diiwaangashan way isku tagi karaan ama way midoobi karaan;
2. Ururka cusub ee ka dhashay midawga ku xusan faqrada hore, dib ayaa loo diiwaangelinayaa, ka dib marka diiwaangeliyuhu, isagoo la tashaday guddiga hubiyo in midawga cusub qaab sharciga waafaqsan loo sameeyay, iyadoo diiwaangelintii ururadii hore ee midawgu saameeyay laga saarayo diiwaanka

QAYBTA 4AAD

HEERARKA DIIWAAN-GELINTA

Qodobka 19aad

Sarkaakiisha diiwaangelinta Gobolada & Degmooyinka

1. Diiwaangeliyaha Guud isaga oo ula jeeda in uu fududeeyo diiwaan-gelinta heerarka gobol iyo kan degmo, waxa uu talo ku siin doonaa Wasiirka in uu u magacaabo diiwaan-geliye, gobol kasta iyo degmo kasta.
2. Diiwaangaliyaha lagu magacaabay si waafaqsan Qodobkan, waxa uu magaca diiwaan-geliyaha Guud:
   a) ku diiwaan-gelin doonaa ururka aan dawliga ahayn ee gobolkaas ama degmadaas hawl-galkiisu ku koobanyahay;
   b) ku bixin doonaa shahaadooyinka diiwaan-gelinta ee heer gobol ama degmo.

Qodobka 20aad

Diiwaan-gelinta ururadda waddaniga ah ee derejooyinka kala duwan leh

1. Marka urur aan dawli ahayn ee la doonayo in uu ka hawl-galo degmo gaar ah, codsiga diiwaan-gelinta waxaa loo soo gudbin doonaa diwangaliyaha degmada.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH

2. Marka urur aan dawli ahayni uu doonayo in uu ka hawl-galo gobol dhamaantii, codsigiisa diiwaan-gelineed waxa uu u gudbi dooona diiwaan-geliyaha gobolka.
3. Ururka aan dawliga ahayn ee waddaniga ah ee baaxadda hawl-galkiisu uu daboolayo ugu yaraan laba gobol iyo ururka aan dawliga ahayn ee caalamiga ah ama shisheeye waxa diiwaan-gelin doonaa diiwaan-geliyaha guud.
4. Marka diiwaan-geliyaha heer gobol ama degmo uu diiwaan-galiyo urur aan Dawli ahayn, waxa uu samayn doona war bixin iyo xogta ururadda la diiwaan-geliyey, waxaanu u diri doonaa diiwaan-geliyaha Guud.
5. Wasiirku waxa uu xeer-nidaamiye ku qeexi doonaa habka ay ku hawl geli doonaan diiwaan geliyeyaasha heerka degmo, gobol iyo qaran oo aan xeerkan ka hor imanayn xeerkan.
6. Ururka diiwaan-geliye degmo u gudbista codsi diiwaan-gelineed ee laga aqbali waayo, waxa keliya ee uu cabashadiisa u gudbin karaa diiwaan-geliyaha gobolka oo go'aan kama- dambeys ah ka qaadan kara.

### Qodobka 21aad

### Xaqiijinta jiritaanka Urur

1. Marka diiwaan-geliyuhu uu ku qanco inuu baaba'ay jiritaanka urur diiwaan-gashanaa, wuxuu soo saari doonaa ogeysiin qoraal ah oo lagu baahin doono faafinta rasmiga ah ama bedelkeeda warbaahinta dalka.
2. Marka ururka aan dawliga ahyni ku guul darraysto in uu u soo gudbiyo diiwaan-geliyaha guud cadeynta jiritaankiisa muddo soddon cisho ah (30) gudahood, diiwaan-geliyuhu waxa uu baabiin karaa shahaadadda diiwaan-gelinta, isla markaana magaceeda ka saari doonaa diiwaanka.

## QAYBTA 5AAD

## MASUULIYADDA XISAABTANKA IYO NIDAAM HOOSAADKA URURADDA AAN DAWLIGA AHAYN

### Qodobka 22aad

### Sharciyeynta Dan-wadaagta

1. Waxa la sharciyayn doonaa dallad/kulan urureed oo ay leeyihiin ururadda aan dawliga ahayn ee waddaniga ahi oo hadda ka dib loogu yeedhi doono "dan-wadaagta ururadda aan dawliga ahayn ee waddaniga ah".
2. Dan-wadaagtu waxay noqon doontaa madal kulmisa ururaddaas oo looga jeedo isu-duwidda iyo wada shaqaynta dhammaan ururadda aan dawliga ahayn ee waddaniga ah ee ka hawl-gala Somaliland gudaheeda.
3. Sida loo aasaasayo, doorkeeda shaqo, xuquuqda iyo waajibaadka dan wadaagta, wasiirkaa ku soo saari doona xeer-nidaamiye, ka dib marka uu la tashado Guddiga USDA.

### Qodobka 23aad

### Hab-dhaqanka anshax (Code of Conduct)

1. Dan-wadaaagtu waxay u ban-dhigaysaa ururadda xiliga shir-sannadeedka wax-qabadkeedii sannadkii dhammaaday waxa kale oo ay u diraysaa ururaddaas go'aannada kasoo baxa shir-sannadeedkaas si ay u hirgeliyaan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH

2. Hab-Dhaqanka ban-wadaagta (Code of Conduct) waxaa lagu ansixinayaa qaraar ka soo baxa dan-wadaagta shir sannadeedkeeda oo ay kasoo qayb galeen saddex-dalool-laba dalool (2/3) ururadda ku jira dan-wadaagta, waxaana lagu faafinaya xeer wasiir muddo shan iyo toban (15) casho gudahood ah, laga bilaabo maalinta la ansixiyay.
3. Hab-dhaqanka iyo nidaamyada dan-wadaagtu waa inay waafaqsanaadaan shuruucda iyo siyaasadaha (policies) dalka u yaal, waxaana xaqiijinaya guddiga USDA.

## Qodobka 24aad

## Wax-qabadka iyo war-bixinaha USDAW

1. Urur kasta oo aan dawli ahayn oo wadani ah, sannad kasta wuxuu diyaarinayaa war-bixinta wax-qabadkiisa oo fah-fahsan, iyadoo la raacayo qaab-tilmaame war-bixineed (reporting format).
2. Ururadda aan dawliga ahayn ee waddaniga ah ee si toos ah uga hela kaalmo dhaqaale deeq-bixiyayaasha, waxay ku muujin doonaan kaalmadaas ay helaan iyo wixii lagu fuliyey war-bixin-sannadeedkooda ku xusan Qodobkan.

## Qodobka 25aad

## Dokumentiyada isku-maamulka

1. Dastuurka iyo dokumantiyada kale ee xubnaha asaaseyaashu ay u gudbiyeen diiwaan-geliyaha wakhtigii la samaynayay codsiyada diiwaan-gelinta ama kuwo ka dambeeyay dastuurka iyo dokumantiyada loo gudbiyay diiwaan-galiayaha waxay noqon doonaan dokumantiyada lagu salayn doono xukunka ama g'aan-qaadashada lagu kala saarayo- haddii muran yimaaddo.
2. Ma jiri doono Urur aan Dawli ahayn oo hawl-geli doona ama fulin doona hawlahooda si ka hor imanaysa dokumantiyadooda ay u soo gudbiyeen diiwan-geliyaha.

## Qodobka 26aad

## Hawl-galka ururadda

1. Ururka aan dawliga ahayn ee u diiwaan-gashan si waafaqsan si sharcigan waxa uu xaq u leeyahay in uu bilaabo wax-qabadkiisa kuwaasoo ay ka mid yihiin dhaqdhaqaaqa mashaarciyeed oo waxtar u leh bulshada iyo sameyn ilo wax-soo saar ku jiheysan joogteynta wax-qabadka Ururka iyo barnaamijyada loo fulinaayo bulshada isla markaana waafaqsan shuruucda dalka.
2. Dakhli-abuurinta ku jiheysan joogteynta hawlaha Ururka waa inay ka muuqataa warbixin-sannadeedka loo soo gudbiyay Guddiga ee ku xusan qodobka 23aad ee xeerkan.

## Qodobka 27aad

## Ogeysiinta bedelaadda dastuurka ururadda aan Dawliga ahayn

1. Isbedal kasta oo dastuurka lagu sameeyo oo ah beddelaad saameyn ku leh ujeedooyinkii hore ee ururka ama magac, ama magacyo masuuliyiin xafiis, waxa lagu war-gelin doonaa diiwaan-geliyaha si qoraal ah.
2. Ogeysiinta la siiyo diiwaan-geliyaha waxa wehelin doona:
   a) Nuqulka go'aanka la gaadhay oo ay sexeexaan mas'uuliinta awoodda u leh sida ku cad dastuurkooda.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
SOLICITOR ... OFFICE
OFFICIAL GAZETTE

b) Nuqulka shahaadadda diiwaan-gelinta haddii qodobada dastuurka Ururka ee la beddelay ay saameyn ku leeyihiin ujeedooyinka hore ee Ururka.

3. Diiwaan-geliyuhu ka dib marka uu helo ogeysiinta waxa uu:
    a) Gelinayaa diiwaanka dhammaan waxyaabaha la beddelay sida lagu soo gudbiyay ogeysiiska;
    b) Bixin doonaa Shahaado cusub oo diiwaan-gelineed-markii loo baahan yahay;
    c) Ka saarayaa diiwaanka wixii isbeddel lagu asameeyey.

### Qodobka 28aad

### Sanduuqa maaliyadeed ee USADW

1. Waxaa la sameyn doonaa sanduuq-maaliyadeed oo ay leeyihiin ururadda aan Dawliga ahyn ee Waddaniga ah. Sanduuqaas waxa iska kaashan doona xukuumadda, Deeq-bixiyeyaasha, hantiilayaasha gaarka ah (private sector) iyo ururadda aan dawliga ahayn. Sanduuqaasu waxa uu wax ka tari doonaa tababarka, kor u qaadidda tayada iyo mugga wax-qabadkooda.
2. Sanduuqan waxa maamulaya Guddiga USDA lagu hagaayo tilmaame Wasiirku soo saari doono marka uu la tashi iyo ogolaansho la sameeyo dhammaan cidda ay khusayso.

## QAYBTA 6AAD

## URURADDA AAN DAWLIGA AHAYN EE CAALAMIGA AH (USDAC)

### Qodobka 29aad

### Diiwaangelinta USDAC

Urur aan Dawli ahayn oo Caalami ahi kama shaqayn karo, kamana fulin karo mashaariic iyo barnaamijyo samafal ama horumarineed Dalka JSL, haddii aanu dalka JSL uga diiwaangashanayn si xeerkan waafaqsan.

### Qodobka 30aad

### Shuruudaha diiwaangelinta USDAC

Ururka aan dawliga ahayn ee Caalamiga ah ee dalbanaya diiwaangelin, waa in uu buuxiyaa shuruudahan:

1. Waa in uu arji codsi diiwaangelin oo ay soo saxeexeen xubnaha aasaasyaasha ama cid si sharci ah uga wakiil ah, u soo gudbiyaa diiwaangeliyaha Guud
2. Waa in uu si rasmi ah uga diiwaangshan yahay dalkiisa, xafiis shaqeeyana ku leeyahay
3. Waa in u dalkiisa ama dalal kale ka fuliyaa mashaariic la xidhiidha wadaagaha (sector) uu ruqsada u dalbaday,
4. Waa in uu ka haystaa deeqbixiye aan dalka deganayn heshiiska iyo dhaqaalaha mashruuc ama mashruucyo uu dalka ka fulinayo Waa in codsigiisa diiwaangelinta ay weheliyaan:
    a) Ruqsada diiwaangelintiisa ee dalkiisa;
    b) Dhukumentiga xogta urureed/hay'adeed (profile), oo ay ku qeexanyihiin ujeeddada ururka, qaab-dhismeedka ururka iyo maamulkiisa, xarunta guud ee xafiiskiisa halka uu yahay iyo cinwaankiisa dalka, sharciyayntiisa waddanka uu asal-ahaan kasoo jeedo, Dalalka kale ee uu ka shaqeeyo, xidhiidhka uu la leeyahay;
    c) Nuqul ka mid ah dastuurka ururka oo ay ku caddahay wadaagaha/wadaagayaasha (sector/sectors) ee uu ururku ka hawl geli doona;



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH

d) Miisaaniyadda dhaqaale ee u dalka gelinaayo,
e) Qorshe-sannadeedkiisa, iyo guud ahaan ilihiisa dhaqaale.
f) Cinwaanka iyo meesha uu ku yaallo xafiiska xarunta u ah Ururka;
g) Caddayntii bixinta Ajuurada diiwaan-gelinta;
h) Qoraal cadayn ah, oo bixisay Wasaarada Arrimaha dibeda u qaabilsan dalkiisa ama Safaarada dalkiisa ee S/land ugu dhaw oo ay ku cadaynayaan jiritaankiisa, waxqabadkiisa iyo in ay masuul ka yihiin wixii ka yimaada;
i) Taariikh-nololeedka (CVs) iyo shahadaha shaqaalaha ka shaqeyn doona Somaliland iyo sababta loogu baahanyahey iyo caddayn dembi- la'aneed oo wadankiisa ka sita;
j) Taariikh-nololeedka (CVs) aasaaseyaasha iyo sawirradooda iyo caddayn dembi-la'aneed oo wadankiisa ka sita;
k) Qorshaha ururka (workplan) ku tallogaley inu ku shaqeynayo oo ugu yaraan sannad ah iyo misaaniyada ku baxeysa oo madaxya leh (itemized Budget).

5. Waa in mashruuca uu dalka ka fulinayo ujeedooyinkiisa iyo qorshihiisuba waafaqsan yihiin siyaasadaha, xeerarka iyo qorshayaasha Qaranka.
6. Waa in uu ogolaansho qoraal ah ka haystaa Wasaarada ama hay'ada xukuumadeed ee ku shaqada leh mashruuca ama barnaamijka uu dalka ka fulinayo
7. Waa in uu mashruuca ama barnaamijka ku fulinayo qorshaha wasaarada ama Hay'ada xukuumada SL ee hawshaasi khusayso, kana fulinayo goobta/goobaha loo cayimo.
8. Waa in uu ka furanayo Dalka xafiis awood go'aan qaadasho oo buuxda fulinta mashruuca iyo ogolaanshaha kharashkiisa leh

## Qodobka 31aad

### Ogolaanshaha & diidmada diiwaangelinta USDAC

1. diiwaangeliyuhu markuu helo codsiga diiwaangelinta ee USDAC wuxuu hubinayaa in dhammaan shuruudaha ku sheegan qodobka hore uu buuxiyay, USDAC, isagoo marka uu u arko lama huraan qaadaya talaabooyinkan:
   a) In uu dalbado soo dhamaystir maclumaad ama dhukumenti ka dhiman
   b) In uu dalbado ama raadiyo cadaymo dheeraada ah
   c) In uu warbixin ka dalbado ama xog waraysto Wasaarada ama hay'ada xukuumadeed ee la shaqaynayo USDAC
   d) In uu xidhiidh la sameeyo masuuliyiin sare ama cida uu deeqda ka soo qaatay ama u balanqaaday ama cid kale oo cadaymo uga baahdo
2. diiwaangelihu markuu hubiyo in shuruudaha xeerkan dhamaystiran yihiin, macluumaadka loo soo gudbiyayna xaqiiq yihiin, wuxuu u gudbinayaa Wasiirka codsiga oo ay ku lifaaqanyihiin, dhammaan macluumaadka uu ka helay codsadaha, warbixin koobaysa wixii uu talaabooyin qaaday ama xog dheeraada ku helay baadhistiisii oo ay weheliyaan talooyinkiisa.
3. Wasiirku, markuu helo macluumaadka faqrada 2aad:
   a. Wuxuu ogolaanayaa codsiga diiwaangelinta, haddii uu ku qanco:
      I. In uu buuxiyay shuruudaha xeerka ku qeexan
      II. Dhammaan macluumaadkiisu dhab yihiin
   b. Wuxuu diidayaa codsiga diiwaangelinta, marka ay u cadaato in aanu u qalmin in la diiwaangeliyo, sababtoo ah:

I. In aanu buuxin shuruudihii xeerku u dhigay

II. In aanay dhab ay ahayn macluumaadka uu soo gudbiyay

c. Wuxuu dalbanayaa baadhis dheeraada iyo cadaymo kale oo lagu go'aan qaato marka loo baahan yahay

4. diiwaan-geliyuhu marka uu helo ogolaanshaha wasiirka wuxuu soo saarayaa shahaadada ruqsada diiwaangelinta USADC, si waafaqsan tilmaamaha xeerkan;
5. Wasiirku wuxuu ku soo saarayaa diidmada codsiga diiwaangelinta qoraal sababaysan, kaas oo ah qoraal maamul oo kama danbays ah

## Qodobka 32aad

## Shahaadada diiwaangelinta

1. USDA ee Caalamiga ah ama shisheeye, marka la diiwaangeliyo, waxaa diiwangeliyuhu siinayaa shahaadada diiwangelinta
2. Shahaadada diiwaangelintu waxaa lagu muujinayaa muddad ay ku dhacayso oo noqonaysa ugu badnaan lix bilood ka dib dhammaadka muddada mashruuca ama barnaamijka loo ogolaaday in uu dalka ka fulinayo

## Qodobka 33aad

## Heshiiska hawl-fulin

1. Marka la diiwaan geliyo ka dib, ururadda Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee Caalamiga ah waxay heshiis shaqo (memorandum of understanding) la saxeexanayaan Wasaaradaha, hay'adaha, ururadda iyo xafiisyada kale ee ay khuseyso (partners), nuqul heshiiskaas ahna waxaa loo gudbinayaa Wasaaradda Qorsheynta, iyadoo diiwaangeliyaha guud uu diiwaangelinayo.
2. USDA oo Caalami ah kama bixi karo, waxna kama bedeli karo heshiiska ku xusan faqrada hore; haddiise ay yimaadaan sababo macquul ah oo USDA, wasaaradii ama hay'adii la gashay, Wasaarada Qorshaynta iyo guddigu ku wada qanceen oo keenaya in heshiiskii hore wax laga bedelo, waxaa dhinacyadu dib u gelayaan heshiis cusub, iyadoo mar kasta la raacayo tilmaamaha faqrada hore ee qodobkan

## Qodobka 34aad

## Cusboonaysiinta Ruqsada USDAC

1. USDA ee caalamiga ah, ee si xeerkan waafaqsan ku diiwaangashanaa ee muddada dhammaanka ruqsadiisa ka hor ka soo hela deeq-bixiye dibadeed dhaqaale mashruuc cusub ama lagu fidinayo muddadii mashruuca hore, wuxuu xoghayaha guddiga u gudbinayaa codsi uu ku dalbanayo cusboonaysiinta ruqsada diiwaangelinta, isagoo ku soo lifaaqaya codsigiisa:
   a. Heshiiska ama balanqaadka mashruuca cusub ama fidinta mashuura hore
   b. Warbixinta waxqabadkiisii hore
   c. Cadaynta shaqo wanaaga ee wasaaradii ama hay'adii uu la shaqeeyay
2. Cusboonaysiinta diiwaangelinta waxaa loo raacayaa tilmaamaha qodobka 32aad ee xeerkan inta ka dabaqmi karta.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 35aad

### Wada shaqaynta USDAW iyo USDAC

1. Ururadda Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee caalamiga ah waa inay dhiiri-geliyaan maal-gelinta ururadda waddaniga ah ee aan Dawliga ahayn (USDAW) kana fogaadaan inay kula tartamaan hawlaha ay qaban karaan ururadaasi si loo xoojiyo tayeynta aqooneed iyo wax-qabad ee ururaddaas waddaniga ah.
2. Barnaamijyada ururadda Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee Caalamiga ahi waa inay la jaan-qaadaan qorshaha guud ee horumarineed ee dalka (national development plan).waa inay dhiiri-geliyaan, muujiyaan mashaariic wax-ku-ool ah oo la taaban karo, isla markaasna ay kala shaqeeyaan ururadda Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee waddaniga ah deegaannada ay ka hawlgalaan kuna badhi-taaraan xoojinta tayadooda aqooneed iyo wax-qabad si loo helo in barnaamijyadaasu sii socdaan siina waaraan oo isku-filllaansho laga gaadho.
3. USDAC, waa in aanay mashaariic fuliye (projects' implementor) u noqon ururadda kale ee Samafalka Caalamiga ah ama shisheeye ama Hay'addaha Qaramadda Midoobay

## Qodobka 36aad

### Qaalabka & Agabka Mashaariicda dhamaatay

1. USDAC waa in Wasaaradda ay la shaqaynayaan iyo diiwaan-geliyaha u gudbiyaa tira-koobka sugan ee agabka iyo qalabka mashruuc kasta oo sannadle ah.
2. Markii mashruuc dhammaado, hantida mashruucaas iyo shaqadii socotayba waxaa lagu wareejinayaa lammaanihii waddaniga ahaa ee hawsha la wadday (partners) sida Wasaarada ama Urur waddani ah oo magaceeda lagu xusay heshiiskii mashruuca ee la wada galay. Haddii hantidaas in ka mid ah looga baahdo in loo adeegsado hawl la mid ah tii hore dalka ka socota waxa lagu go'aansanayaa wada-tashi dhinacyadu u dhan yihiin.
3. Ururku Samafalka caalamiga ah wuxuu ku wareejinayaa Wasaaradda Qorahaynta iyo Horumarinta Qaranka dhamaan hantida ityo agabka xafiiska marka labada dhinac mid ka mid ahi go'aansado inuu soo afjaro hawl-galladii ururka

## Qodobka 37aad

### Cashuurta shaqalaha & ajuurada diiwaangelinta

1. USDAC waa in cashuurta dakhliga ee ku waajibtay shaqaalaha waddaniga ee u shaqeeya ururradooda kasoo gooyaan una gudbiyaan Wasaaradda Maaliyadda sida ku qeexan xeerarka cashuuraha dakhliga ee dalka.
2. Xadidaadda Ajuurada diiwaan-gelinta ee ururadda samafalka aan dawliga aheyn (USDA) ee Caalamiga ah ama shisheeye ku waajibtay waxaa Dikreeto ku soo saaraya wasiirka.

## Qodobka 38aad

### Warbixinaha USDAC

1- USDAC waa inay u soo gudbiyaan guddiga la-tashiga arrimaha USDA Iyo Wasaaradda Qorsheynta Iyo horumarinta qaranka iyo ciddii kale ee ay la shaqeeyaan war-bixin wax-qabadeed lix bilood leh ah iyo mid sanadle ah. War-bixintaas oo ay ku jiraan arrimaha soo socda:



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

a. Wax-qabadkii fulay, wax-qabadkii baaqday, sababayntii iyo odoroska wax-qabad ee lixda bilood ee soo socda;

b. Kharashka miisaaniyadeed ee baxay, inta hadhsan iyo odoroskeeda mustaqbalka;

c. Turun-turooyinka ama caqabadaha la soo dersay, duruustii laga bartay iyo talo-soo-jeedinta.

2- Wasaaradu ka dib marka ay la tashato guddiga la-tashiga arrimaha USDA, waxay :

a. U yeedhi karaan USDA warbixinta soo gudbiyay si wax uga waydiiyaan macluumaadka la xidhiidha warbixintooda

b. Baadhis iyo hubin ku samayn karaan xaqiiqda warbixinta.

3. USDA ee Caalamiga ah ee ku guuldaraysta soo gudbinta warbixinta ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan Wasiirku wuxuu qoraal digniin xambaarsan ku siinayaa waqti cayiman gudihii in ay ku soo gudbiyaan warbixintooda, isagoo ogaysiin ka siinaya qoraalkaas guddiga USDA iyo wasaarada ama hay'ada xukuumadeed ee ay heshiiska wada galeen

4. Haddii USDA ee caalamiga ah ee u hogaansami waayo digniinta wasiirka, wasiirku wuxu ka gaadhayaa go'aan ka dib marka uu la tashado guddiga la-tashiga arrimaha USDA.

## Qodobka 39aad

## Shakhsiyada Qaanuuneed

1- USDA waxay leeyihiin shakhsiyad qaanuuneed, wax way dacwayn karaan waana la dacwayn karaa si xeerarka dalka waafaqsan

2- Xeerkani ma siinayo dhowrsoonaan (xasaanad) iyo xuquuq diblomaasiyadeed ururadda ku diiwaan-gashan.

3- Markuu shaqaale ajnebi ah oo u shaqeeya Urur aan Dawli ahayn oo Caalami ahi uu bixin waayo qaan-sheegatooyin ama deyn lagu yeeshay. waxa deymahaas loo raaci doonaa ururkii dalka keenay ee uu u shaqaynayey.

## Qodobka 40aad

## Buugaagata Xisaabta Iyo diiwaannada

Ururadda Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee Caalamiga ah waa inay yeeshaan, si buuxdana u dhaqan geliyaan nidaam-xisaabeed dhan oo sax ah oo ka kooban hantidooda, deymaha, dakhliga iyo kharashaadka si waafaqsan nidaam-xisabeedka caalamiga ah ee lagu dhaqmo

## Qodobka 41aad

## Anshax-marin & Masuuliyad Ciqaabeed

1. Wasiirka ayaa talaabo anshax-marin ka qaadaysa USDA ee la yimaada hab-dhaqan ama fal anshax-marin lagu mutaysan karo.
2. Tallaabooyinka anshax-marin ee guddigu qaadan kartaa waxay noqonayaan:
   a. Digniin qoraal ah
   b. Canaan qoraal ah
   c. Ganaax
   d. Ka hakin ruqsada diiwaangelinta muddo cayiman
   e. Ka laalis ama kala noqosho ruqsadeed
3. Wasiirku wuxuu xeer-nidaamiye faahfaahsan ku soo saarayaa:



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

   a. Hab-dhaqanada iyo falalka USDA ay anshax-marin ku mutaysan karaan
   b. Falkasta ama hab-dhaqan kasta talaabada anshax-marin ee ay mutaysan karaan USDAW, USDAC
   c. Hab-raaca anshax-marinta
   d. Habka fulinta talaabada anshax-marineed
   e. Ganaaxa xaddiga ganaaxa ugu badan iyo falalka lagu mutaysan karo
   f. Muddada ruqsada la hakin karo
   g. Cawaaqibka ka dhalan kara iyo habka loo maaraynayo

4. Go'aamada anshax-marineed, waxaa looga caban karaa habka cabashada go'aamada maamul ee kama danbaysta ah
5. Falkasta oo denbi ciqaabeed ka dhalanayo oo lagu jebiyo xeerkan ama xeerarka ciqaabeed ee dalka ee qof shaqaale ahi galo waxaa masuuliyadeeda qaadaysa cidii gashay, iyadoo loo marayo hab-raaca denbiyada ciqaabta.

## QAYBTA 8AAD

## QODOBO QUBANE AH

### Qodobka 42aad

### Arrimaha Shaqada

Arrimaha shaqada la xidhiidha waxa lagu dhaqayaa xeerka shaqaalaha rayidka ee Somaliland. Heshiis shakhsi ama wadareed oo dheef (faa'iido) sareysa ama badbaadin shaqo oo ka badan tan xeerka Shaqaalaha, waa lala geli karaa shaqaalaha.

### Qodobka 43aad

### Daabacaadda/faafinta

Diiwaangeliyaha Guud wuxuu sanad kasta ku daabici doonaa faafinta rasmiga ah ama warbaahinta gudaha magacyada:

a. Dhammaan ururadda Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee la diiwaan galiyay;
b. Dhammaan ururadda Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee is ba'abiyey ama iskood u burburay;
c. Dhammaan ururadda aan Dawliga Ahayn ee diiwaanka laga saaray si xeerkan waafaqsan.

### Qodobka 44aad

### Dib u qiimayn & Dib u diiwaangelin

1. Marka la dhamaystiro dhismaha Guddiga USDA, diiwaangeliyaha guud iyo diiwaanka guud, isla markaana la soo saaro xeer-nidamyada xeerkani waajibiyay, Wasiirku isagoo la tashaday Guddiga wuxuu soo saarayaa hage faahfaahsan oo dib loogu qiimeeyo, dibna loogu diiwaangeliyo, ururadda Samafalka aan Dawliga ahayn, ee wadaniga ah ama Caalamiga ah ee hore uga diiwaangashanaa dalka xeerkan ka hor.
2. diiwaan-geliyaah Guud isagoo hagahaa raacaya, wuxuu dib u diiwaangelinayaa USDA ee hore dalka uga diiwaangashanaa, wuxuuna soo saarayaa liiska USDA ee dalka ka diiwaangashan

## Qodobka 45aad

### Xeer-nidaamiye

Wasiirku isaga oo la tashanaya Guddiga USDA wuxuu soo saarayaa xeer-nidaamiye uu ku dhamaystirayo kuna fulinayo xeerkan

## Qodobka 46aad

### Luqadda Xeerkan

Afka (luqadda) xeerkani waa af-Somaali, haddii af-kale lagu minguuriyo (lagu tarjumo), oo is-maan-dhaaf ka yimaaddo, waxa loo noqonayaa nuxurka nuqulka af-Soomaaliga ah.

## Qodobka 47aad

### Laalid ama tirtid

Xeerkani markii la ansixiyo waxa uu laalayaa dhamaan xeerarkii ka horeeyey ee la ujeeddo ahaa ee ka hor imanaya nuxurkiisa.

## Qodobka 48aad

### Dhaqan-gal

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka ay ansixiyaan Golayaasha sharcidejintu M/waynuhuna saxeexo.

C/raxmaan Maxamed c/laahi (ciro)

Gudoomiyaha Golaha wakiilada

C/risaaq siciid ayaanle

xoghayaha Guud ee G. Wakiilada

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE